



Daraasaddaha laga soo qaatay Deegaanka Khatarta Badbaadada ee Adeegga Sirdoonka Nabadsugidda New Zealand 2024

Kiisaskani waxay ka yimaaddeen [Deegaanka Khatarta Amniga e New Zealand Adeegga Sirdoonka nabadsugidda New Zealand](#). Warqadda macluumaadkan “dowladda shisheeye” waxay ka dhigan tahay **wadan walba oo aheyn New Zealand**. Eraygan waxa loo adeegsadaa wadamada ka baxsan New Zealand.

Adeegga Sirdoonka Nabadsugidda New Zealand (NZSIS) wuxuu faragelinta shisheeye ku qeexaa fal ay ku kacdo waddan shisheeye, oo inta badan ku dhaqma qaab wakiil ah, kaas oo loogu talagalay in lagu saameyo, lagu carqaladeeyo ama lagu dumiyoo danaha qaranka New Zealand iyadoo loo adeegsanayo hab khiyaano, musuqmaasuq ama qasab ah. Hawl diblumaasiyadeed ee caadiga ah, u ololaynta iyo dadaallada kale ee dhabta ah ee la rabo in lagu helo saameyn looma tixgeliyo faragelin.

Kiis daraasaadka 1

Sannadkii 2023, dawlad shiisheeye ah ayaa adeegsatay xidhiidhka New Zealand si ay cadaadis ugu saarto golaha deegaanka iyaga oo u bandhigaya inay gacan ka geystaan maalgelinta dhacdo bulsho haddii ay oggolaadaan inay xaddidaan ka qaybgalka koox diimeed gaar ah. Dawladda shisheeye waxay doonaysay in la ogaado in kooxdani ay mamnuuc ka tahay dalkooda oo ay ka fuliyaan hawlo ka dhan ah rabitaanka qurba-joogta gobolka.

Kiis daraasaadka 2

NZSIS waxay ka warqabtaa dhowr dublamaasiyiin matalaya dowladd shisheeye kuwaas oo xiriir la leh tiro kooxo arday ah oo New Zealand ah oo xiriir la leh dadka qurba-joogta ah ee gobolkaas. Diblomaasiyiintu waxay u isticmaaleen helitaankan inay saameyn ku yeeshaan xubnaha kooxda iyagoo isku dayaya inay hubiyaan in kuwa loo doortay jagooyinka hoggaanka ay siyaasad ahaan daacad u yihiin dawladda shisheeye. Waxay doorteen inay mugdi galiyaan xiriirkha ay la leeyihiin kooxaha ardayda si ay uga fogadaan eedeymaha faragelinta bulshada tacliinta. In ay sidaas isu dhaqmaan waxay tusaale u tahay faragelinta shisheeye. Waxay raadinayaan inay xakameeyaan sida kooxahan iyo xubnahooda ay u arkaan dowladda waxayna ujeedadoodu tahay inay ogaadaan kuwa diidan.

Kiis daraasaadka 3

Tiro yar oo dawlado shisheeye ah ayaa ururiya macluumaadka bulshooyinka gaarka ah ee New Zealand. Inta badan goboladani waxay isticmaali doonaan xubnaha bulshada si ay ula socdaan dadka aragtida dawladda shisheeye ah ee mucaaradka New Zealand iyo ururinta tafaasiisha gaarka ah iyaga. Macluumaadkan waxaa loo isticmaali karaa in lagu fuliyo ficiil aargoosi ah sida tirtiridda fiisaha ama bartilmaameedka xubnaha qoyska ee weli ku nool waddanka shisheeye. Sannadkii 2023, waddan shisheeye ayaa diiday codsiga fiisaha ee qof New Zealand ah oo isku dayaya inuu soo booqdo qoyska waddanka sababtoo ah xiriirkooda koox bulsho oo aan dawladda shisheeye jeclayn.